Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
GolahaShacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kal.8-aad kul.13-aad **01/06/2016**

Kalfadhiga 8-aad
Kulankiisa13-aad Saac.fur.11:39gh.Saac.Xir.4:45gd.
Guntinta(Quorum) 158Xildh.
Ajendaha:-

1. **Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
2. **Ansaxinta Ajendaha**
3. **Hadal-jeedinta Guddoomiyaha Golaha Shacabka eek u abbaaran shuruucda hortabinta leh iyo soo afjaridda howlaha horyaala Baarlamanka kalfadhiga 8-aad.**
4. **Qaybinta qabyo-qoraalka Mashruuca sharci ku saabsan Ansixinta Sharciga wax ka bedelidda Dastuurka .**
5. **Qaybinta Warbixinta Guddiga Xuquuqul Insaanka ee ku saabsan Akhrinta 3-aad Sharciga lagu dhisayo Guddiga Madaxa-banaan ee Xuquuqul Insaanka.**

1.Shir-guddoomiye Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Muxammad Sheekh Cusmaan (Jawaari).

2.waxaa shirka furey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Muxammad Sheekh Cusmaan Jawaari ,waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah ,uuna akhriyey habdhowre Xildhibaan Sh.shaacir.

Guddomiyaha wuxuu sheegay sharcigii lagu soo dhisayey guddiga madaxa-banaan ee xuquuqul insaanka intaa saa maku ogolnahay,ajendaha horyaala ayuu sheegay in uu akhrinaayey una soo jeediyey in la ansaxiyo Ajandaha,Xildhibaanadana way ansaxiyeen .

Kadib Guddomiyaha wuxuu sheegay in maalintii axada aheyd la soo waxaa kulan yeeshey Guddiga joogtada ah oo ay wada-hadal yeeshen eyna ka wada-hadleen hawlaha horyaala Baarlamanka laysla meel dhigo wixii la fulinkaro iyo waxa aan la fulinkarin iyo wixii dib loo dhigaayo waayo hindise sharciyada oo heerar kala duwan maraayo looma gudbinkaro Baarlamanka soo socda . Hindise sharciyeedyo maraaya akhrinta 3aad looma dib dhigi karo Baarlamanka soo socda,Golahana uu go'aan ka gaaro muddada uu haysto ,inta laga gaari waayana xukuumada lagala tashado la noqoto. Sidaasi daraadeed waxaa xalay la soo hordhigay 11 qodob,

wuxuuna xildh.ka codsaday wixii fakradahooda ee ka geestaan sida lagu dhameystiri karo hindiso sharciyeed yadaan, waxaana kamid ah:-

1. **Hindiso-Sharciyeedka Xanaanada Xoolaha, oo maray akhrintii 3aad oo maalintii la ansaxin lahaa dib u dhacay iyadoo gaariwaysay kooramkii codeenta lagu galin lahaa.**
2. **Hindiso Sharciyeedka Dhismaha Maxakamadda Dastuuriga oo martay akhrinta 1aad ayna u dhimanyihiin aqrinta 2aad iyo 3aad ayna diyaar tahay sida ay guddiga iigu soo wargaliyeen.**
3. **Hindiso Sharciyeedka Xuquuqda aadanaha oo soo maray akhrinta 1aad iyo 2aad oo ay u dhiman tahay akhrinta 3aad, kadibna loo codeeyo.**
4. **Hindiso Sharciyeedka Isgaarsinta Qaranka oo isna maray akhrinta 3aad oo uu Guddomiyaha Guddiga Isgaarsinta ayaa naga codsaday in dib loo dhigo in uu kala tashado Wasarada Isgaarsinta iyagaana laga warsugaaya.anaganan Guddiga ayaan ka warsugeynaa.**
5. **Hindiso Sharciyeedka Ladagaalanka Argagixisada ,horey waxay sheegen inay u baahan yihiin inay sameeyaan wadatashi dhowr qodob ah, ay soohordhigeyn ilaa dodobo qodob.(7) ayna ubaahan yihiin inay soo darasadeyaan wuxuu sheegay Guddomiyaha Jawaari inay ka sugayaan goorta ay soo ay soo matleysto**
6. **Mashruuca Sharci ee Axsaabta Siyaasada oo soo maray akhrinta 1aad iyo 2aad ayna u harsan tahay akhrin 3aad in la marsiyo kadibna loo codeeyo.Guddigana waxay ii sheegeyn in ay Xukuumadda waxay fikrad ka qabtay aysoo gudbisay, ayaamahaan Guddiga aad ayuu kaga shaqeeyay oo wadiyaar inay horkeenaan Baarlamaanka Akhrinta 3-aad.**
7. **Hindiso Sharciyeedka kaalimaha shidaalka oo maray akhrinta 2-aad. Ayuuu marayaa Walin Guddiga warbixin igama siinin, haddii ay joogaan Guddiga aynu ka dhageysandoonaa.**
8. **Mushruurca xuquuqda liiltirka ayna yeelanayaan siyaasiyiinta Dowladda Federaalka Soomaaliyeed oo maray akhrinta 1 iyo 2-aad,seddexaad iyo waxaa u dhiman in loo codeeyo isagana waa diyaar sideey Guddiga anshaxa iyo Xeer-hoosaadka ay ii sheegeyn.**
9. **Hindise-sharciyeedka wax kabadalka miinada iyo waxyaalaha qarxa akhrin 2-aad ayuu marayaa Guddiga ayaa warbixin naga siindoono sida ay u maareeyaan.**
10. **Hindise-sharciyeedka Maareynta Maaliyadda oo maray akhrinta 1-aad ayuu marayaa sharcigaan wuu balaaran yahay Guddiga waxay leeyihiin waxaan rabnaa inaan kasoo shaqeyno illaa usbuuc marka matleyn-karaan ayay keeni karaan.**
11. **Dib-u-eegista sharciga Guddiga mada-banaan ee xuduudaha federaalka wuxuu maraayay codeyn.**
12. **Xisaab Xirka Misaaniyadda 2015-ka bisha 6-aad ayuu dhigayaa xeer-hoosaadka in xisaabxirka la dhameystiro.**
13. **Dib-u-eegista Miisaaniyadda 2016-ka waa codsi xukuumaadda ka yimid goor ay inaaneyso lama yaqaano laakiin maaliyadda ayaana loo xilsaaray in ay madal kasoo sameeyaan.**
14. **Mushruuca Sharciga Xasaanadda Golaha Shacabka wali ma marin akhrin 1-aad iyo 2-aad midna laakiin Guddiga wuu diyaariyay, mushruucaan sharciga nedaamka**

shuruucda Baarlamaanka sidoo kale guddiga Xeer-hoosaadkaa diyaariyey ,laakiin ma marin akhrinta 1-aad iyo 2-aad waa mashruu sharci oo Baarlamanka ka bilaabanaayo.

15. **Ansaxinta sharciga wax ka bedelidda Dastuurka ayaa iyana ah labo qodob ay u baahanyihiin in wax laga bedelo qodobka 136 farq. 2-aad iyo qodobka 60aad oo ah in la buriyo oo lagu bedelo Aftida qaranka goorta la dhigaayo in dib loo dhigo iyo qod.60-aad oo ah mid caddeyn u baahan iyo qeyxid xilhaynta Baaralamaanka 9-aad mudada uu ku egyahay in ay noqoto hindise sharciyeed oo loo qeybshay Golaha ah wax ka bedelid Dastuur oo qod.60-aad uu Baarlamankaan xilheyntiisa ku egtahay markii la soo saaro natiijada doorashada Baarlamanka cusub ee 10-aad,waxaa kaloo yaala soo bandhigida soo jeedinta ee guddiga dib-u-eegista dastuurka iyo guddiyadda kuna saabsan cutubyadda 6,7,8 iyo 9-aad oo ku kala saabsan nadaamka golaha sharci dejinta uu yeelanaayo ,laanta fulinta Madax-weyne iyo xukuumad laanta garsoorka qaabka ay yeelanayaan waa 4-ta cutub oo ka dhinneyd tobankii cutubla soo gudbiyey oo soo dhameystireyn ,haddii ay jiraan wax kale oo deg-deg ah ama xukuumadda federaalka ay golaha in loo dhiso intaas oo shuruuc ah ayaa yaala in xildhibaanadda sharafta leh ay gaaraan go'aanka arrimaha hortabinta leh in la fuliyo. Arrinta hindise sharciyeedka uu guddoonka maanta uu soo bandhigay waa 2-qodob oo ku saabsan qod. 136 arrintaasi oo ahmiyad gaar ay leedahay Baarlamanka in uu si fiican fiiro uu yeesho. waxaa xil toos u saran Baarlamanka in tallaabo laga qaado oo dalka la badbaadsho 2-arrimood ,arrinta 1-aad qod.136 faqr. 2-aad ay fareysaa wuxuu dastuurka furmayaa ,hindise sharciyeedka dastuurka oo ka koobab 3-qodob ,waa xil toos u saran haddey yihiin xildhibaanada oo dalka laga badbaadsho 2-arrimood,arrinta koowaad faqr.2-aad qod.136 wuxuu amrayaa in mudadada xil-haynta lagu jiro baarlamanka sagaalaad dib-u-eegista dastuurka iyo Afti qaran in la qaado ,labo arrin suurta galeysa ma aha haddi aan la sameynin intaas waxay noqoneysaa in dastuurka ku meel gaarka oo hadda la haysto uu buro markaas la qaato charter loo noqdo ama dastuur la'aan in ay dhacdo dalka marxaladaas in laga badbaadsho waa muhiim ,arrinta xigtana waxaa weeyaan in xilhaynta baarlamanka federaalka baarlamaan kale oo la soo daartay baa bedelaya.haddii arrintaas aan la sameynin waxaa dhicikarta forse majore awood gacanteyna ka baxsan in ay dhacdo ama ay doorashada ay dhici weyso ,dastuurka wuxuu leeyahay si aysan u dhicin nadaam ku yimid jiritaanka hay'adaha dowladda sida ku cad qod.60-aad faqr.1-aad mudada xilhaynta xilhaynta baarlamanka federaalka 9-aad waa Afar sano xilhayntiisa rasmi ahaan ku egtahay maalinta lagu dhawaaqo matiijada doorashada Baarlamaanka 10-aad ee Cusub ayaa la farayaa. Qodobka 136 wuxuu leeyahay in aad ansixisaan ,waxaa qodobkaan lagu buriyey qod.136 dastuurka federaalka faqr.2-aad kuna saabsan qabasho afti qaran si kama danbeys ah lagu ansaxiyo dastuurka federaalka, faqrada 2-aad ee lagu soo kordhiyey waxay tahay waxa aftida qarameed dib loogu dhigay lana abaabulidoonaa in lagu jiro mudada xilhaynta Baarlamanka 10-aad 2020.labadaas qodob waa muhiim in Baarlamanka fiiro gaar u yeesho oo ansaxiyo loona baahanyahay in 184 iyo wax ka badan in golahu ku ansaxiyo si dhib ugu badbaado waxaa furan in ra'yigiina la dhageysto ,shuruucda meeshaas ku tixan,wuxuuna tala ahaan u soo jeediyey in la kala hormariyo wixii codeyn u baahan in la hormariyo aan kan labaad ku jira aan sii galno sidaa loo wado . wuxuu ka codsadey xildhibaanada shuruucdaas hortaalo inta**

hortabinta leh in ay maareeyaan soo jeedintiisana ay tahay ilaa 15-ka Ramadaan in la shaqeeyo 15-ka danbana cibaadeysi la aado,kadibna dib laysku soo noqdo shuruucda halkaas laga sii wado .

Xildh.Geeseey ,wuxuu sheegay in xildhibaanada ay ku shaqeynayaan Dastuurka dalka xilligaana laga gudbo howlaha golaha horyaala ,iyagoo xildhibaanadda jooga oo la agmarey ,mana aha in Dastuurka qeybna lagu tunto ,qeyna la yiraahdo halaga shaqeeyo. wuxuu soo jeediyay in la ilaaliyo ku dhaqanka dastuurka gacanta hadda aan ku jirinna la gelinin lana dhigin meel mugdi ah..

Xildh.Cabdi Axmed Dhuxulow, wuxuu sheegay in waqtiga uu yar yahay ayna u hartay xildhibaanada 80 casho wuxuu sheegay in shuruucda aad akhriseen aan waqti loo helaynin.

Wuxuu soo jeediyay in shuruucda 3 -lagu soo kobo oo kala ah:-

1. **Sharciga Xisbiyada**
2. **Sharciga Xuquuqul Insaanka**
3. **Sharciga Adeega Garsoorka.**

Wuxuu kaloo soo jeediyay in warqadaan la ansixiyo.

Xildh.C/risaaq . wuxuu sheegay in uula qabo fikirka Xildh isaga ka horeeyay, wuxuu codsaday in la ansixiyo ugu yaraan laba sharci marka la shiraayo,wuxuu sheegay in uu kamid yahay Guddiga ka soo shaqeeyay Sharciga Asxaabta siyaasada ayna ku qaadatay mudo 9 bilood ama hal sano bil dhiman tahay, wuxuu soo jeediyay in sharcigaan maanta la asixiyo.

Xildh.Maxamed Cabdi Yuusuf, wuxuu sheegay in labada qodob ee dastuurka wax kabadal lagu sameeyo lana ansixiyo. Guddomiyaha wuxuu soo jeediyay in maalinta sabtida laga dhigo Ansixinta wax kabadalka Dastuurka.

Xildh.Daahir Amiin Jeesoow, wuxuu sheegay in qodobka 138aad ee dastuurka uu sheegaayo dameestirka Maamul Goboleeydada dalka iyo goboladaas si loo waafajiyo dastuurka kumeelgaarka.

Xildh.Caadil Sheegow, wuxuu sheegay inuu ku raacsan yahay xildh.asaga ka horeeyay wuxuuna soo jeediyay in afar qodob ay xukuumada la noqonayso.

1. **Hindiso Sharciyeedka Axsaabta siyaasada**
2. **Hindiso Sharciyeedka Xuquuqul Insaanka**
3. **Hindiso Sharciyeedka Adeega garsoorka**
4. **Hindiso Sharciyeedka Maxkamada Dastuuriga.**

Xildh.Cabdi Shire Jooqle, wuxuu sheegay in arinta uu sheegay Xildh.Caadil Sheegow in aan laha reebin adeega Garsoorka. Wuxuu soo jeediyay arinta labada qodab la ansaxiyo oo xildh, ay soo xaadiraan.

Xildh.Xiis Muuse Cowl, wuxuu sheegay in maalinti sabtidii hore ee codoon noo joogtay, waa inaad sheegtaa sababta, tan kale waa in la cadeeyo waqtiga lashaqeenaayo in uu dastuurku ku cadyahay Aug.20.2016.

Xildh.Tahliil, wuxuu sheegay inay ogyihiin in sharciga la jibiyaya wuxuu soo jeediyay in adeega garsoorka xubnihiisa la keeno oo la ansixiyo .

Xildh.Goodir,wuxuu sheegay in sharciga xanaanada xoolahauu u yahay lafdhabarka dhaqaalaha dalka, wuxuu soo jeediyay in maanta la ansixiyo. In labada qodob ee dastuurka wax laga badalo iyo dhamaan shuruucda u taalo Barlamanka FS in la ansixiyo.

Xildh.C/llahi Xusen Coonka, wuxuu sheegay in labada qodob ay muhiim yihin ayna ogyihiin in shuruucdi hore loo ansixiyay ay wali faafinta kusoo bixin.

Xildh.Caasha Koos, waxay sheegtay labadan qodob ay muhiim u tahay jiritaanka dalka,waxay soo jeedisain shuriicda hortaada Barlamanka la ansixiyo, sida Maxkamada Dastuurka iyo Xuquuqul Insaanka.

Guddomiye Jawaari,wuxuu sheegay in talabixinta sharciyinta hortabinta ay sheegeen:-

1. **Sharciga Axsaabta Siyaasada**
2. **Sharciga Xuquuqul Aadanaha**

Wuxuu kaloo sheegay in aan wax lagu dari Karin waqtiga,waayo waxaa loo socdaa Dimuqraadiyad iyo in Golohaan uu ku wareejiyo Baarlamanka cusub ee 10aad, Baarlamanka 9aad uu ku egyahay markii natiijada doorashada la soo saaro.

KALFADHIGA 8AAD.KULANKIISA 13AAD UU SHIR GUDDOMINAYE GUDDOMIYAHA BAARLAMANKA JFS MUDANE MUXAMMAD SHEEKH CUSMAAN (JAWAARI), WUXUU SHEEGAY IN SHIRKA UU XIRAN YAHAY SAACADA MARKA AY AHYAD 2:00 OO GH